Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Musharaxa: Brendan Kolding
Magaca Ololaha: Kolding oo isu sharaxaya Degmadda 1
Bogga internetka Ololaha: www.BrendanKolding.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada:1
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (206) 458-4408
Horudhaca Musharaxa:
Seattle waa magaalo bilicle. Fikradaha adduunka beddelaa halkan ayay ka yimaadeen. Fikradahan waxay keeneen koboca, iyo xanuuno kobcaya. Siyaasadaha nidaamka xisbiyad abadan ee Gollaha deegaanka Magaalada waxay ka hor joogsadeen jawaabaha fikrada wanaagsan xanuunadan kobcaaya. Halkii ay ka ahaan lahaayeen masuulada ilaha magaalada, Gollaha Degmaddu waxay xooga saaareen kordhinta cashuuraha iyo ku adkaynta ganacsiyada yaryar iyo qoysasku inay sii jiraan. Kumanyaal ayaa hoy la'aan ah. Dadka daawaynta u baahan waxay meeraystaan jidadka. Waaxdu boolisku way sii yaraanaysaa. Jidadka iyo gaadiidku aad ayay u liitaan. Magaaladii bilicda lahayd dhib ayay ku jirtaa.

Waxaan doonayaa inaan sameeyo shabakada gobolka ee gurmadka guryaha iyaddoo xooga la saarayo adeegyada bulshadda. Waxaan doonayaa inaan ka dhigo saraakiisheena booliska inay dareemaan kuwa la qiimeeyay oo awood la siiyay si ay u qabsadaan shaqadooda. Waxaan doonayaa horumarka wax qabadka loogu talo galay. Waxaan doonayaa gaadiidka ku filan dad waynaha. Waxaan doonayaa masuuliyada bixinta waxyaabaha nolosha mahuraanka u ah iyo kharash garayn aan mad-madow lahayn. Waxaan doonayaa inaan dareen fahan oo wanaagsan iyo falan qayn caqli wanaag ah u keeno Hoolka gollaha Magaalada. Waxaan doonayaa inaan dowlad wanaagsan u keeno Seattle.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Musharaxa: Lisa Herbold
Magaca Ololaha: District 1 for Herbold
Bogga internetka Ololaha: district1forherbold.org
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 1
Lambarka Teleefoonka Ololaha: lama/helo
Horudhaca Musharaxa:
Waxaan bilaabay shaqadayda ku saabsan adeega dadweynaha sannadkii 1998 waxaan u shaqeeyay Guddiga Magaalada tan iyo 2015. Laga bilaabo Alki illaa South Park, iyo deriska inta u dhaxeeya, waxaan bixiyaa adeego wax ku ool ah, xoogan, oona wax qabad leh iyo siyaasado lagu sheegayo kala duwanaanshaha wayn ee dakhliga Seattle.
Maadaama aan ahaa xubinka Guddiga Degmadaada 1, Waxaan ku caawiyay gudbinta nooca siyaasadaha laga hirgeliyay magaalooyin kale: Lacagta La siiyo Qofka Xanuunsan, Jadwal Ammaan, Barnaamijka Baarista Kirada, Mamnuucida Xogta Dakhliga Midab takoorka, $29 milyan oo ah rahaamada guriga la awoodo, barnaamijka kala duwanaanshaha cadaalada dembiga, iyo barnaamijka caawimaada sharciyeed si aysan dadku u waayin guriga, dheefaha dadweynaha, ama rukhsadaha.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Kahor City Hall, Waxaan ugu adeegay bulshadayda meelooyin baddan, ay kamid tahay guriga la siiyo dadka guri la'aanta ah, ururka guriga la awoodo, Nidaamiyaha Deriska dakhliga-hoose iyo Nidaamiyaha Kireystaha.

Anigu waxaan leeyahay gabar, waxaana ayeeyo u ahay wiil iyo gabar. Anigu sidoo kale waxaan eedo u ahay labba gabdhood ee uu ninkayga Bob dhalay. Waxaan ku noolahay Highland Park tan iyo 2000.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Murashaxa: Phil Tavel
Magaca Ololaha: Tavel oo u sharaxan Seattle
Websaydka ololaha: tavelforseattle.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 1
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-949-8680
Hordhaca Murashaxa:
Seattle waxay joogta ais goyska jidadka. Arrimaha badbaadada daran ee dad waynaha way sii kordhaysaa. Iibka maandooriyaha aadka loo arko iyo isticmaalku wax caadiya ayuu noqday. Sanado badan sidii difaacaha dad wayne waxay isiisay fahanka nidaamka demiga cadaaladeed, kaas oo aan rumaysanahay inaan wax badan ka qaban karo si aan u caawiyo dadka ay ku dhacday arrimaha caafimaadka maskaxda iyo/ama isticmaalka maandooriyaha. Seattle wax wanaagsan ayay qaban kartaa.

Dedaalka magaala ee ah in wax laga qabto dhibta hoy la’aanta lamay jaan qaadin korodhka dadka aan hoyga lahayn.

Dadka degen ee dabaqadadhexe ah ayay ku qaaliyoobaysaa magaaladu, jidadku way ka sii xumaadeen oo saraakiisheena la dooratay meel ayay ku tawafeen. Bulshooyinka iyo mulkiilayaasha ganacsiyada D1 iyo magaalada oo dhan waxay dareemeen kuwa aann la dhegaysan oo la iska dhega mariyo.

“Jidka Seattle” si wayn waxaa loogu yaqaanaa qool aan dhammaad lahayn oo nidaamyo natiijo lahaan ah. Waa wakhtiga “Jidka Seattle” ee cusub, midka ka hadla dhibaatooyinka oo xooga saara xalalka.

Waa wakhtigii isbeddelka. Fadlan u codee Phil Tavel, Degmadda 1.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Musharaxa: Ari Hoffman
Magaca Ololaha: Hoffman for Seattle
Bogga internetka Ololaha: www.hoffmanforseattle.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 2
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-775-8767
Horudhaca Musharaxa:
Ari Hoffman wuxuu u tar-tamayaa Guddiga Gobolka, Degmada 2, maadaama ay badanayaan dadka la kulmaya guri la'aanta ee lagu waajibiyay Ari si loo sameeyo magaalo Seattle oo ammaan, iyo caafimaad leh. Seattle waxay diyaar u tahay xal wax qabad iyo naxariis leh, oo loogu talogalay dareenka guud. Ari wuxuu ku shaqeeyaa guddiga qubuuraha Yuhuuda, halkaas oo dadka ka qanacsada daroogada iyo dhilooyinka ay jebiyeen guri khaas ah, ku xad gudbay qabuurta, oona ku xad gudbay dadka dhulka ilaaliya. Ari wuxuu bilaabay olole wacyi gelin ah, wuxuuna la kulmay xubnaha Guddiga Magaalada, xubnaha bulshada, iyo waaxda booliiska. Hawsha, arimaha miisaaniyada, maktabka, iyo ciladaha ku saabsan nidaamka ayaa lasoo sheegay. Ari wuxuu ka horyimid Madaxa Canshuurta iyo, si wadajir ah ururada cawska, lasoo aruuriyay sixiixo ku filan si rafcaan loogu sameeyo aftida. Ari wuxuu ku noolyahay oona ku shaqeeyaa gudaha Degmada 2, halkaas oo asaga iyo xaaskiisa ay ku koriyaan carruurtooda, wuxuuna shaqaaleeyaa dadka ku nool guud ahaan Seattle. Sida ahaanshihiisa qof iskaada u shaqeeya, wuxuu sannado baddan ku qaatay samaynta barnaamijyada dhallinyarada. Ari wuxuu u adeegaa ururo baddan oo aanan-dheef doon ahayn wuxuuna caawiyay in la sameeyo iskuulo iyo dhismooyin bulsho.

Musharaxaan ma ahan mid kaqayb qaadanaya Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Musharaxa: Christopher Peguero
Magaca Ololaha: District 2 for Peguero
Bogga internetka Ololaha: christopher@district2forpeguero.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 2
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-665-4338
Horudhaca Musharaxa:
Christopher Peguero waa aabe, nin, iyo Jinsiga Queer Latinx waana Asal Maraykan ah wuxuuna u doodaa cadaalada bulshada iyo, jinsiga, iyo deegaanka. Asaga iyo ninkiisa Anthony waxay ku noolyihiin Beacon Hill waxayna la noolyihiin carruurtooda Alexander iyo Adela.
Christopher wuxuu ka shaqeeyay Magaalada Seattle City Light wax ka baddan toban sanno halkaas oo uu ku isticmaalay Qalabka Bilaabida Cadaalada Bulshada iyo Jinsiyadaha Magaalada si uu ugu doodo sinaanta iyo cadaalada. Asaga waa aasaasaha kooxda xiriirka Sinaanta ee Seattle wuxuuna u doodaa sinaanta goobta shaqada ayada oo aan la eegaynin jihaynta galmo ama nooca qofka. Muhiimadiisu waxay tahay in uu kula shaqeeyo bulshada kor u qaadista hufnaanta, sinaanta, iyo helida dhaqan ahaan ee dowlada.

Christopher waa musharaxa Guddiga Magaalada Seattle ee Degmada 2.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Musharaxa: Mark Solomon
Magaca Ololaha: Friends for Mark Solomon
Bogga internetka Ololaha: marksolomon.org
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 2
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-679-1162
Horudhaca Musharaxa:
Magacaygu waa Mark Solomon waxaana ahay musharaxa Guddiga Magaalada Seattle, Degmada 2. Waxaan ku dhashay kuna soo koray Degmada 2 waxaana fursad u helay in aan ku noolaado guriga ayeeyadayda dhistay. Midaan waa bulshadayda dadkeedana waa deriskayga; Waxaan la kulmay isbedelada waxaana fahmayaa wel-welada. Ku dhowaadkii 30 sanno, Waxaan ku shaqeeyay ammaanka dadweynaha iyo arimaha tayada nolosha saamaynaya deriskeena. Waxaan leeyahay taariikh ah in aan dadka isugu keeno si wada jir ah si ay u sameeyaan isbedel wanaagsan. Muddo aad u dheer, Guddiga Magaalada wuxuu dib u dhigay baahooyinka iyo wel-welada Degmadan, sidaas darteeda marka la tixgelinayo arin kasta oo la hor keeno Guddiga, fikirkayga ugu horeeya wuxuu noqon doonaa sida uu arinkaasi u saameynayo Degmada. Waxaan balan qaadayaa in aan noqdo qof wax qabad leh, la heli karo oona mas'uul ka ah dadka ku nool Degmada. Waxaan codsanayaa taageeradaada, codkaaga iyo aad muhiim u ah, kalsoonidaada.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Murashaxa: Phyllis Porter
Magaca Ololaha: Dadka u codaynaya Phyllis Porter
Websaydka ololaha: electphyllisporter.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 2
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-582-5150
Hordhaca Murashaxa:
Waxaan doonayaa inaan xaqiijiyo in Degmadda 2 ay noqon karto goobta qoysaska ka soo jeeda qoomiyado kala duwan iyo heer dhaqaale oo kala duwan ay ku noolaan karaan oo ku badhaadhaan.

Waa inaan dadka u dayno guryahooda oo ka caawino helida guryo kuwa aadka ugu baahan. Waxaan ka shaqayn doonaa ballaadhinta xeerarka taageera kuwa khatarta ugu sugan in hoyga laga saaro, ay ka mid tahay: dhowrida in guryo laga saaro, la talinta daynka, gaadiidka iyo caawimada adeega nalka iyo biyaha, adeegyada sharciga iyo taageerada shaqada, iyo caawimada kirada xiliga gaaban.

Degmadda 2, dad badan oo degen waxay ku tiirsan yihiin gaadiidka dad waynaha, baaskeeladaha kaxaysashadooda socodkooda maalinlaha ah. Degmadayadu waxay leedahay heerka dhaawac iyo waxyeelo ee ku lugta lah dadka wadada lugaynaya iyo kuwa baaskiiladaha ku dhex wata magaalada, oo waxaan ku ballan qaadayaa hagaajinta dhibaatooyinkan.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Sidii abaabule waayoa rag ah iyo u doodaha badbaadada gudaha Seattle, Waan sii wadi doonaa inaan keeno miiska dadka aan la metelin. Qof kasta waxa uu u qalmaa in la maqlo, oo waxaan si aan daal lahayn uga shaqayn doonaa inaan dhegaysto oo adiga kuu doodo.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Tammy Morales
Magaca Ololaha: People for Tammy Morales
Bogga internetka Ololaha: www.votefortammy.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 2
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206.399.0478
Horudhaca Musharaxa:
Waxaan u tartamayaa si aan u sameeyo awood la siiyo deriskeena ku nool Degmada 2. Waxaan aaminsanahay in dhagaysiga fikradahaaga iyo ahmiyad siinta kuwa aadka u saamaynayso siyaasada magaalada - deriskeena shaqaynaya oona leh dakhli-hoose, dadka waawayn, qaxootida, deriskeena naafada ah, iyo bulshada dadka midabka leh.
Maadaama aan ahay gabar ay dhashay hooyo keligeeda ah ee aan haysanin nin, Waxaan arkay dhibaatada ay la kulmaan qoysaska shaqeeya kuwaas oo isku dayaya in ay shaqaystaan.

U dagaalanka qoysaska shaqeeya waa sababta aan u ahay nidaamiyaha Isbahaysiga Tallaabada Xeebta Rainier (Rainier Beach Action Coalition). Waana midaas sababta aan u ahay madaxa-kaqayb qaataha Guddiga Xuquuqaha Aadanaha Seattle. Waana midaas sababta haweenayda kongereska ka tirsan Jayapal iigu magacoowday naagta horyaalka u ah qoysaska shaqeeya markii ay igu taageertay tar-tankan.

Waa wakhtigii ay magaalada oodhan nala shaqayn lahayd, ma ahan kaliya in ay la shaqayso dadka yar ee hantida leh. Haddii la i doorto, Waxaan balan ku marayaa in aan sii wado in aan ku dhagaysto oona codkaaga gaarsiiyo City Hall.

Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga iyo waraaqahaaga lacagta.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Musharaxa: Ami Nguyen
Magaca Ololaha: Saaxiibada Ami Nguyen (Friends of Ami Nguyen)
Websaydka ololaha: www.electami.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada 3
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-225-4671
Hordhaca Murashaxa
Waxaan ahay inan ay dhaleen qaxooti Fiidnaamiis ah oo ku kortay faqri. Caawimada barnaamijyada kaalmada dowladda iyo waxbarashadda dadwaynaha daraadood, ayaan waxaan awooday inaan ka qalan jebiyo Jaamacadda Stanford. Waxaan u huray mihnadayda xirfadeed ee sharciga adeega dad waynaha. Sidii qof Difaacaha Dadwaynaha ah, waxaan la shaqeeyaa dadka hoy la'aanta ah ee qaba jirrada maskaxda iyo la dagaalanka qabatinka maandooriyaha.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Waxaan leeyahay waayo aragnimo aan wax u dhigmaa jirin iyo xirfado wax lagaga qabanayo dhibaatada hoy la'aanta iyo arrimaha awood u helida iska bixinta. Waxaan u baahanay inaan ka shaqayno qorshe shan sanno ah oo xooga saaraya guriyayanta, taageerada joogtada ah ee guriyayanta, iyo fursada labbaad ee barnaamijyada shaqada. Waa inaan dadka guryo u helnaa iyo ay ka xor ahaadaan dadka wayeelka ah dakhliga go'an ee kordhka cashuurta dhismaha ee ku salaysan dakhliga gobolka. Awoodidu keliya kuma saabsana dhimista kharashyada guriyayanta, laakiin sidoo kale gaadiid raaca, daryeelka carruurta iyo kharashyada cuntadda. Dedaaladeena tamarta cagaaran waa inay heli karaan dadka dhammaan dhakhliyada oo dhan ah. Si wadajir ah, waxaan ka dhigi karnaa Seattle meel dhammaan la wada leeyahay.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Egan Orion
Magaca Ololaha: Egan oo u sharaxan Seattle (Egan for Seattle)
Websaydka ololaha: EganForSeattle.org
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada 3
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-682-7328
Hordhaca Murashaxa
Sidii jiilka afraad Degmadda 3 qof degen, waxaan arkay Seattle oo isbeddeshay, kobocday, oo badhaadhay. Laakiin waxaan arkay qaar badan oo ka mid ah jaarkaygii oo gadaal lagaga tegay, dhammaan Gollaha Deegaanka Magaalada waxa uu ku fashilmay inuu si ku filan uga jawaabo kharashyada guryaha ee cirka isku shareeray, faafitaanka aadka ah ee qabatinka maandooriyaha, iyo dhibaatada hoy la'aanta. Arrimaha aan wajahnay waa kuwa baqdin leh, laakiin dadkeena Seattle degen waxaan nahay dad fikrado wanaagsan abuuri kara. Waxaan u baahanahay mid cusub, hogaan wada shaqayn leh oo xubnaha gollaha magaalada ah kuwaas oo dhisi doonaa biriishyada, aanse gubayn iyaga.

Marka xubintii Gollaha deegaanka Sawant aanu ka jawaabayn codsiyada, waxaan iskaga wareegay oo ku noqday shaqaalaha wacyi gelinta hoy la'aanta ee xaafadahayaga. Marka bulshadda LGBTQ ay u baahatay qof inuu la wareego Xaflada Pride, anaa soo tallaabsaday oo ka dhigay xafladii ugu waynayd gudaha Seattle. Waxaan caawiyey dib u soo noolaynta Broadway. Waxaan ku qaatay mihnadayda sidii mid aan macaash doon ahayn, hogaamiyaha LGBTQ dhisaya bulsho oo xalilaya dhibaatooyinka. Haddii la i doorto, waxaan wadajir idiin kala shaqayn doonaa inaan abuurno bilow cusub ee Seattle.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Murashaxa: Kshama Sawant
Magaca Ololaha: U codee Sawant 2019
Websaydka ololaha: KshamaSawant.org
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 3
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-486-0099
Hordhaca Murashaxa:
Waxay su'aali ka joogtaa sanadkan waa cida u tartamaysa Seattle — Amazon iyo ganacsiga wayn, ama dadka shaqeeya. Muddada labba xili ee u horeeya, Waxaan meeshayda u isticmaalay inaan dhiso dhaqdhaqaaqyada si loogu guulaysto guulaha taariikhiga ah sida $15/saacadii mushaharka ugu yar, xuquuqaha kiraystayaasha sida kharashka sooguurida iyo qorshaha lacag bixinta, iyo ku beddelida "Maalinta Columbus" Maalinta Dadka Asalka wadanka ah.

Seattle degdeg waxay ugu baahan tahay xakamaynta kirada, iyo ballaadhasho aad u wayn oo guryaha bulshadda ah. (tayoo aad u saraysa, dad wayne leeyahay, guryo si joogta ah loo awoodo kiradooda) oo ay maalgeliso cashuurida Amazon iyo gancsiga wayn, aan qoysaska shaqaynaya ahayn ama ganacsiyada yaryar. Waxaanu u Baahahay Heshiis Cusub oo Cagaar ah dadka shaqaynaya, abuura kumanyaal mushaharka lagu noolyahay, shaqooyinka la mideeyay qalabaynata dhismayaasha, u wareegaya tamar nadiif ah, iyo kordhinta gaadiidka badan, ka dhigaya mid si buuxda koronto u leh oo bilaash ah.

Beesad kama aqbalayo shirkadaha, Maamulayaasha shirkada, kuwa u dooda ganacsiyada, ama horumariyayaasha wayn. Anigu keliya waxaan guriga u qaataa mushaharka shaqaalaha celceliska ah, kuna deeqaa baaqiga mushaharkayga $130,000 ah dhaqdhaqaaqyada bulshadda.

Murashaxan kama qayb gelayo Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Logan Bowers
Magaca Ololaha: Logan oo u sharaxan Seattle (Logan for Seattle)
Websaydka Ololaha: https://www.votelogan.org/
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 3
Lambarka Telefoonka Ololaha: 360-797-9037
Hordhaca Murashaxa:
Waxaad u qalantaa xubin ka tirsan gollaha kaas oo meteli doona xiisahaaga oo dhegaysta bulshadaada. Waxaanu u baahanahay hogaanka cusub ee Gollaha Magaalada inay xaliyaan dhibaatooyinka hoy la'aanta, awoodis la'aanta kirada guryaha, iyo sinaan la'aanta ka soo baxday magaaladeeda.

Waxaan ahay mulkiile ganacsi yar, qof ilaa weligii Seattle degana, iyo kirayste. Waxaan arkay magaaladeena oo samaatay, laakiin dadka iyo bulshooyin ayaa gadaal lagaga tegay. Waxaan doonyaa qof kasta inuu ka faa'iidaysto barwaaqada Seattle, oo waxaan hayaa qorshe.

Waxaan qorshaynayaa inaan dib u sharciyeeyo guriyaynta la awoodi karo anoo u oggolaanaya cufnaanta saaxiibtinimada leh ee xaafada taas oo Gollahu mamnuucay.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Waxaan hayaa qorshe hoy lagu gaynayo jaarkeena aan hoyga lahayn, sababtoo ah waxaanu hadda keliya haynaa 6,000 oo sariiraha goobta gaboodka ah ilaa 12,000 oo qof.

Waxaan hayaa qorshe lagu kordhinayo sinaanta jaararka iyo dugsiyada go'doonsanaa laga bilaabo 1950naadkii iyadodo ay sababtay sharciyada laga baxat.

Aniga ii codee, Logan Bowers, oo si wada jir ah waxaanu hawlgelin karnaa qorshahayga.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Pat Murakami
Magaca Ololaha: Pat for Seattle
Bogga internetka Ololaha: www.patforseattle.org
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 3
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206.383.3384
Horudhaca Musharaxa:
Waan idin salaamay, codbixiyayaasha Degmada 3.

Waxaan u tar-tamayaa Guddiga Magaalada Seattle sababtoo ah waxaynu awoodnaa in aynu wax fiican samayno.

Waxaan ku noolahay degmada wax ka baddan 35 sanno waxaana ahay qof deriska oo iskaada u shaqeeya muddo 20+ sanno ah. Maadaama aan ahay mulkiilaha ganacsiga IT (30+ sanno), Waxaan ku caawiyay inbaddan oo ganacsiyo ah guud ahaan magaalada, waana fahmayaa waxa loo baahanyahay si loo sameeyo shaqooyin leh mushaar-lagu noolaan karo. Waxaan ka joojiyay Duqa magaalada Nickels in uu isticmaalo ku xad gudubka guriga midaas oo lagu qasbayo dadka iska leh guriga ee leh dakhli-hoose iyo qofka qaxootida ah in ay uga iibiyaan gurigooda lacag jaban dadka meesha dhisa.

Haddii la i doorto, Waxaan balan qaadayaa:

In aan marwalba diyaar u ahaado in aan sheego wel-weladaada.
Hor istaago dadka meesha dhisa ee waawaynka ah.
In aan sameeyo guriyo baddan oo la heli karo, gaar ahaan la siiyo qoysaska haysta carruurta.
Kusoo rogo dadka meesha dhisa lacago saamaynta dhismaha ah.
In aan bixiyo baxnaanis daroogada-amarka ah, adeegaha taageerada iyo caafimaadka maskaxda ah.
In aan sameeyo barnaamij iibsasho guriga ah ee la siiyo dadka ugu horeeya ee jawaaba, macalimiinta, kalkaaliyaasha, dadka ganacsiga ah.
In aan sameeyo shaqooyin mushaar lagu noolaan karo.
In aan taageero ganacsiyada yar-yarka ah.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Musharaxa: Zachary DeWolf
Magaca Ololaha: Dooro Zachary DeWolf (Elect Zachary DeWolf)
Websaydka Ololaha: electdewolf.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 3
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-395-5112
Hordhaca Murashaxa:
Waxaan u tartamayaa Gollaha Magaalada Seattle sababtoo ah wakiilnimadayda hadda nooma shaqaynayso dhammaanteen. Waxaan u baahanahay hogaan xooga saara xalalka oo waxaanu uqalanaa wakiilnimo ay ka go'an tahay dhegaysiga qof kasta, aan kala qaybinayn dadka. Sidii Maamulahaaga Guddida Dugsiga Seattle, waxaa sharaf ii ah inaan shaqeeyo maalin kasta anoo metelaya dhammaan ardaydeena, macalimiinta iyo qoysaska. Sidii maareeyaha barnaamijka ee Dhammaan Guriga Degmadda King, waxaan xoga saaray shaqadayda tirtirida hoy la'aanta dhalin yarada iyo maalgelinta xalalka la cadeeyey sida, barnaamijyada duwista iyo ka hortagga. Sidii Guddoomiyihii hore ee Gollaha Bulshadda Capitol Hill iyo sidii Guddoomiyaha Guddida ee Masuulada Guriyeyeta Seattle, waxaan u dagaalamay xaafadaheena, kiraystayaasha xuquudooda, iyo xalalka guriyayanta la awoodi karo. Waxaan keeni doonaa waayo aragnimo Gollaha Magaalada Seattle. Sidii xubintaada Gollaha, waxaan ka shaqayn doontaa si aan uga dhigo magaaladeena mid aad u soo dhawayn badan, la awoodi karo, oo ay ku noolaan karaan dhammaan jaarku.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Alex Pedersen
Magaca Ololaha: Elect Alex Pedersen
Bogga internetka Ololaha: www.ElectAlexPedersen.org
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 4
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-502-9092
Horudhaca Musharaxa:
Alex Pedersen wuxuu u tar-tamayaa Guddiga Magaalada si loo kordhiyo mas'uuliyada. Kadib markii uu qaatay shahaadada Mastarka ah ee ku saabsan Maamulka Dowlada, Alex wuxuu u shaqeeyay Waaxda Guriga iyo Horumarinta Magaalada ee Waddanka Maraykanka intii lagu guda jiray Maamulkii Clinton. Shaqada Alex waxaa kamid ah wax ka baddan 15 sanno oo u shaqeeyay qaybta khaaska ah ayada oo uu ahaa maamulaha tifa-tirka dhaqaalaha si loogu maal-geliyo xajinta guriga la awoodo.
Alex wuxuu usoo shaqeeyay sida Caawiyaha Sharciga ee Madaxa Guddiga Magaalada Tim Burgess midkaas oo madax u ahaa Guddiga Miisaaniyada. Alex wuxuu sameeyay xalka loogu talogalay Barnaamijka Iskuulka Xanaanada Seattle ee tayada-sare ee laga sameeyay dhinaca codbixiyayaasha sannadkii 2014. Alex wuxuu horseeday dadaalo lagu maal-gelinayo Iskaashiga Kalkaalisada Qoyska (Nurse Family Partnership), barnaamijka kusalaysan-daliilka ee awood siinaya hooyooyinka haysta dakhli-hoose iyo dhallaankooda.

Si ihtimaan loo siiyo arimaha bulshada iyo ganacsiyada yar-yarka ah ee Waqooyiga bari ee Seattle, Alex wuxuu daabacday wargayska loogu talogalay 5-tii sanno ee lasoo dhaafay.

Xaaska Alex waxay dhalatay kuna soo kortay Seattle iyo, ka baddan toban sanno, ayay ku korinayeen carruurtooda meel u dhow Candy Cane Lane.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Musharaxa: Cathy Tuttle
Magaca Ololaha: Friends of Cathy Tuttle
Bogga internetka Ololaha: http://cathy4council.org/
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 4
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (360) 362-9739
Horudhaca Musharaxa:
Waxaan doonayaa inay ku duqoobo magaalada aan jecelahay. Waxaan doonayaa in caruurtayda, iyo dhamaan caruurtoodu, ay awoodaan inay doortaan nolol farxad leh, wax soo saar leh oo ay halkan ugu noolaadaan. Waxaan ku koriyay labadayda caruurta ah guriga Wallingford ee aan deganahay maanta.

Waxaanu ku jirtaa wakhti go'aankeenu qaabaynayo mustaqbalkeeda. Wax ayaan ka qaban karaa.

Waxaan leeyahay khibrad 30 sano ah oo u shaqaynta dadka reer Seattle ah, aniga oo ka shaqayn jiray Gudida Qorshaynta, iyo maamulaha marshruuca Seaatle Parts oo 40 beerood iyo xarumo bulsho ah. Kadibna waxaan aas aasay hay'adaha samofalka ah ee 350 Seattle iyo Seattle Neighborhood Greenway si aan hormar ugu sameeyo cimilada oo aan jidadka uga dhigo kuwo amaan ah.

Waxaan ku faraxsanahay inaan maqlo fikirkaaga maadaama oo aan ka shaqaynayo inaan helo taageeradaada. Waxaan balan qaaday inaan sii wado inaan codkaaga geeyo City Hall aniga oo adiga ku matalaya.

Waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa codkaaga, joofarkaaga, iyo taageeradada si aan ugu shaqeeyo Dawlada Hoose ee Seattle.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Emily Myers
Magaca Ololaha: Saaxiibada Emily Myers
Bogga internetka Ololaha: https://emilyforseattle.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 4
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 360-559-1486
Horudhaca Musharaxa:
Emily Myers waa saynis yahanad iyo abaabulaha shaqaalaha oo u tartamaysaa Gollaha Magaalada Seattle. Waxaa intaa u dheer shaqadeeda xaga Jaamacadda Washington agabka

horumarka in la daraaseeyo Cudurka Parkinson, waxay ku jirtaa guddida fulinta ururkeeda UAW4121, ergayga Gollaha Shaqada (Labor Council) MLK, hogaamiyaha 500 Haweenka Saynisyahanada (Women Scientists), la asaasaahaha Shabakada Xeerka Sayniska Washington (Washington Science Policy Network), iyo Sarkaal hore ka ahaa Guddida Dimuqraadiga Degmadda 43naad. Emily waxay aaminsan tahay Seattle inay u baahan tahay mid naxariis leh, siyaasado caddayn ku salaysan oo meel isugu keena xuquuqaha shaqaalaha, qoysaska, iyo bulshooyinkeena aadka u tamarta darran. Emily waxay u dagaalami doontaa guri in qof walba helo, daryeelka carruurta iyo waxbarashadda hore, mushahar wanaagsan iyo dheefaha si loo awdo gol daloolada mushaharka sinjiga ku salaysan, iyo horumarka magaalada & gaadiidka yareeya raadkeena kaarboonka ah. Ku ballan qaadan foojaradaada dimuqraadiyada, ku mutadawaca, ama wax badan ka baro websaydkeeda emilyforseattle.com

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Ethan Hunter
Magaca Ololaha: Ethan Hunter 4 Seattle City Council
Bogga internetka Ololaha: https://hunter4seattlecitycouncil.com/
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 4
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (206)-535-5733
Horudhaca Musharaxa:
Ethan Hunter wuxuu u tar-tamayaa Guddiga Magaalada Seattle degmada 4aad sababtoo ah wuxuu aad xammaasad ugu hayaa arimaha muhiimka u ah dadka degan Waqooyi bariga Seattle: asaga oo caawinaya dadka guri la'aanta ah ee magaaladeena iyo kuwo aadka daciifka u ah, asaga oo ka dhigaya waxbarashada sare mid la heli karo, oona sheegaya baaxada u dhaxaysa lacag bixinta-jinsiga iyo nooca, ka dhigaya gaadiidka dadweynaha mid leh qaab qiimo-wax ku ool ah, oona ilaalinaya deegaankeena. Wuxuu balan ku maray in uu la shaqeeyo xubnaha saaxiibadiisa ah ee guddiga, madaxda bulshada, dhaq-dhaqaaqayaasha, iyo ganacsayada deegaanka si loo sameeyo qorshooyin la fulin karo kuwaas oo keenaya isbedel. Maadaama uu yahay mid kasoo baxay Iskuulada Dadweynaha Seattle, Ethan waa mid si gaar ah u og caqabadaha ay la kulmayaan ardaydeena iyo macalimiinta. Maadaama uu yahay arday dabakhada-shaqaysa ah, asaga wuxuu si gooni ah ugu qalmaa in uu matalo dadka dabakhada-shaqaysa ah ee ku nool Waqooyiga bari ee Seattle. Ethan wuxuu deganyahay Degmada-U. Wuxuu ku raaxaystaa in uu wakhti la qaato eeyadiisa, Castro iyo Jose, in uu daawado Shimbiraha badda iyo ciyaaha Badda, iyo in uu si iskaada ah ugu shaqeeyo ololayaasha siyaasada.

Musharaxaan ma ahan mid kaqayb qaadanaya Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Murashaxa: Frank Krueger
Magaca Ololaha: U codee Frank Krueger
Websaydka ololaha: https://votefrank.org
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 4
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-536-7853
Hordhaca Murashaxa:
Waxaan ahay mulkiilaha ganacsiga yar iyo kirayse gudaha Wallingford, oo waxaan doonayaa inaan Seattle ka dhigo magaalo uu ku noolaan karo qof kasta, Waxaa la igu koriyey gudaha qoyska ka shaqeeya baabuurta ee dabaqada shaqaysta oo waxaa la ibaray inaan si adag u shaqeeya oo aan wax dib ugu soo celiyo bulshadda.

Waxaan lahaa mudnaanta inaan la shaqeeyo oo aan wax ka barto dad badan, injineerada ilaa shaqaalaha bulshadda ilaa bad maaxyada iyo qof kasta oo u dhexeeya. Waxaan ku dhex koray dad kala duwan iyo fikrado gudaha Seattle, oo waxaan doonayaa inaan xaqiijiyo in kuwa kalana ay sidaas karaan sidoo kale.

Waxaan difaacay kala duwanaanshaha noloshayda oo dhan. Intaa ku jiray ganacsigayga, waxaan shaqaaleeyay muhaajiriinta oo waxaan ka caawiyey iyaga inay maraan nidaamka sharciga Maraykanka oo noqdaan Maraykan cusub.

Qof kasta waxa uu leeyahay qiime oo shakhsi kasta waxa uu u qalmaa in la dhegaysto. Waan dhegaysan doonaa. Waan garanayaa waayo aragnimadayda iyo anshaxa shaqada inay u adeegi doonto Seattle markaan ku siiyo codka gollaha magaalada.,

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Joshua Newman
Magaca Ololaha: Vote Joshua Newman
Bogga internetka Ololaha: votenewman.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 4
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-963-2397
Horudhaca Musharaxa:
Maadaama ay Seattle sii weynaanayso, waxaynu u baahanahay hoggaamiyayaal ku xira qiyamkeena ah sida bulsho aragtida mustaqbalka ah. Guddiga Magaalada waa in uu noqdaa mid ka jawaaba baahooyinka dadka magaalada degan halka sidoo kale ay tahay in uu mas'uul ka noqdo oona la kulmo dadka uu u adeego. Joshua Newman wuxuu ku noolaa Seattle labaatan sanno hadana wuxuu carruurtiisa afarta ah la korinayaa xaaskiisa, Emily. Maadaama uu yahay Injineerka Warshadeed ee Boeing, Madaxa Hore ee Guddiga Bulshada Maple Leaf, muddo dheerna ahaa u doodaha gaadiidka, Joshua wuxuu u dagaalami doonaa deriskeena, wuxuuna ilaalin doonaa shaqooyinka leh mushaar lagu noolaan karo iyo deegaankeena, wuxuuna u shaqaynayaa si aan marnaba daal lahayn si loo bedelo saamaynta waxyeelada leh ee dhibaatooyinka guriga la awoodi karo. Shaqadiisa nolosha waxay ahayd sidii loo xalin lahaa mushkiladaha asaga oo dadka oo dhan isugu keena miiska. Asaga waa dhab ahaantii waxa ay Seattle u baahantahay wakhtigan, mustaqbalkeena la wadaago. Joshua wuxuu ku faanaa in uu

kaqayb qaadanayo barnaamijka Warqada lacagta Dimuquraadiyada waxaana sharaf u ah in uu helo codkaaga.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Musharaxa: Sasha Anderson
Magaca Ololaha: Sasha For 4
Bogga internetka Ololaha: sashafor4.org
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 4
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-228-6845
Horudhaca Musharaxa:
Waan ku salaamay, Anigu waxaan ahay Sasha. Waxaan jiraa 12-sanno waxaana deganahay Degmada 4, joogto ah Greenlake, iyo kireyste ku taamaya in aan guri isla iibsano wiilka aan isku doonanahay.

Waxaan ku shaqeeyaa adeega dadweynaha, hadda la shaqeeya Walaalada Waa wayn iyo Walaalaha Waa wayn (Big Brothers Big Sisters), halkaas oo aan ku maamulo barnaamijka ilaalinta dugsiga sare. Aniga waxaa sharaf ii ah in aan la kulmo dhallinyarada magaaladeena ee caqliga leh, waxaana balan ku marayaa in aan u sameeyo meel Seattle oo loo simanyahay.

Waxaan u tar-tamayaa si aan ugu adeego Degmada 4 sababtoo ah magaaladeena waa mid u waynaanaysa si dhakhso ah waxayna u baahantahay hogaamiyayaal awood leh kuwaas oo balan ku maraya in ay u wada shaqeeyaan si wada jir ah si loo hubsado dheefaha degane kasta oo ka ahaada dhinaca weynaanta bulshadeena. Midkaan waa nooca hogaamiyaha aan keeno shaqadayda maalin walba, waxaana kusii wadayaa in aan keeno hoolka magaalada.

Ololahaan waa mid ku saabsan in codkaaga iyo khibradayda la gaarsiiyo Guddigeena Magaalada. Waxaan u tar-tamayaa sida deriskaaga oo kale, iyo qareenkaaga. Igu soo biir oona kaalay aynu wada dhisno waxyaabo wanaagsan!

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Murashaxa: Alex Tsimerman
Magaca Ololaha: Alex oo u sharaxan America
Websaydka ololaha: AlexforAmerica.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 5
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-324-6264
Hordhaca Murashaxa:
Salaan Qaranka (21 dhibcood)

Alex Tsimerman, murashaxa Seattle waxa uu rumaysan yahay in qorshahan uu dib ugu celin karo 2 bilyan oo doolar sanadkii dadka.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

1. KIRADA - 50% dabaqyada dadku degen yihiin shaqaysan kara wax ka yar $40,000 oo kirada kama badnaan karto 30% dakhligooda. Ma jiraan cashuurta dhisayaasha guryaha ama mulkiilayaasha guryaha. Isbeddelkan, inta hadhay 50% dadka waxay bixin doonaan 30% mushaharkooda oo qof kastaa waxa uu la sinaan doonaa heerka nolosha ee Maraykanka.

2. JOOJI CASHUURTAHA IIBKA WAX KA YAR $100 – Laama cashuuri doono shay kasta oo ka yar $100....milyaneeradu waxay lahaan doonaan jaritaan badan oo cashuurta ah. Waa wakhtigii saboolka iyo dabaqada dhexe ay isku wax haysanyeen.

3. JOOJI MAAMULKA SHIRKADAHA WAA WAYN – Jooji qulqulka shirkadaha waa wayn sida Amazon iyo Vulcom oo u rar shirkadahan magaalada hoose. Tani waxay hagaajin kartaa magaalooyin badan iyo dhibaatada gaadiid raaca.

4. JOOJI KUWA QASHINKA BADAN . MASHAARIICDA WAA WAYN IYO QANDARAASYO SII QAATAYAASHA – Jooji ST3.

Murashaxan kama qayb gelayo Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Ann Davison Sattler
Magaca Ololaha: Jaarka Ann
Websaydka ololaha: NeighborsforAnn.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 5
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-775-8838
Horudhaca Musharaxa:
Wax ka badan labbaatankaygii sanadood iyo dheeraadka ee gudaha magaalada, waxaan ku noolaa xaafado kala duwan oo ku yaala Seattle. Waxaan ahay hooyada labba carruura, qof u ololeeya isbeddelka, iyo qareen, Marka aan hore ugu shaqaynayay Seattle SuperSonics, waxaan hadda ku leeyahay goob yar oo sharci ah oo ku taala Seattle oo waxaan dhigaa fasalada sharciga ganacsiga caalamiga ah xaga Kulliyada UW Continuum (Continuum College).
Haddii ay tahay wax barid gaar ah xaga Xarunta aaga Ururka Dhalin yarada Seattle(Central Area Youth Association), ama matadawaca tababarka kubbada dhalin yarada, adeega bulshadda aad ayuu muhiim iigu yahay. Waxaan sidoo kale joogay oo ka qayb ahaa mutadawacnimada guddida dugsigayaga deegaanka, hoy la'aanta, guriga soo kabashada dadkii hore loo xidhay, iyo xerada qaxootiga ee dalal dibadaha ah ku taala.

Baaqa bulshadda ee horumarka hoy la'aanta iyo guriyaynta, badbaadada dad waynaha, iyo ka hortagga qabatinka maandooriyaha/ka soo kabashada waxay igu dhiiri geliyeen u tartanka xafiiska. Hogaamiye ay ka go'an tahay ka jawaabida walaacyada dadka deegaanka ah iyo masuuliyada bixinta waxyaabaha nolosha mahuraanka u ah, horumarka macnaha buuxa leh waa suuragal gudaha degmadda 5. Waxaan ballan ku qaadayaa noqoshada baabuurka isbeddelka.

Musharaxaan ma ahan mid kaqayb qaadanaya Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Musharaxa: Debora Juarez
Magaca Ololaha: Debora oo u sharaxan Degmada 5 (Debora for District 5)
Websaydka Ololaha: www.deborajuarez.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 5
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-258-5767
Hordhaca Murashaxa:
Xubinta Gollaha Debora Juarez waxay tartantay 2015 sababtoo ah Waqooyiga Seattle waxay iska dhega marinayeen muddo dheer. Iyaddoo soo martay waayoa ragnimadeeda sida qareen, garsoore, hooyo, iyo 31 sano jaarka Degmadda 5, waxay dhegaysatay dadka degan xafada, u dagaalantay D5, oo gudbisay natiijooyin dhab ah oo ay ku jiraan"

- $18 milyan oo Xarunta Bulshadda cusub ee Lake City
- $1.6 bilyan garoon caalamku isticmaalo xaga xarunta Seattle, oo aan kharash ku joogin cashuur bixiyayaasha.
- Si buuxda loo maalgelinayo Northgate Biriishka Lugta iyo Baaskiilka
- $80 milyan NHL xarunta tababarka xaga Northgate
- Keenida 1200 oo qaybood oo cusub oo guryo la awoodi karo D5.

Xubinta Gollaha Juarez waxa uu ka dhigay jidadkeena mid badbaado badan isagoo dhisaya meelaha la maro jidadka dhinacooda, oo ku daraya boolis badan, oo kordhinaya Kooxda Gooshida iyo Sharci Fulinta Ay Caawiso Duwida (LEAD). Waxay u heshay malaayiin doolar hayadaha deeqda aan macaashdoonka ahayn si ay u caawiyaan jaarkeena aan hoyga lahayn. Waxay u dagaalamaysaa si ay u furto 130th St. Light Jidka Tareenka 7 sano horteed.

Laakiin, weli waxaa jira wax badan oo la qabanayo. Fadlan u codee Xubinta Gollaha Juarez!

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: John Lombard
Magaca Ololaha: Friends of John Lombard
Bogga internetka Ololaha: votejohnlombard.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 5
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-486-0439
Horudhaca Musharaxa:
Waxaan u tar-tamayaa Guddiga Magaalada si loo keeno hoggaamin kulug lahaansho, iyo wax qabad leh Degmada 5; si loogu caawiyo Magaalada in ay samayso oona fuliso jawaab celin saamayn leh oo dhab ah, oona isku dheeli tiran oo wax looga qabto dadka guri la'aanta ah; iyo si loogu caawiyo Magaalada in ay diirada saarto arimo kale oo muhiim ah, ay kamid tahay ammaanka dadweynaha, guriga la awoodo, iyo gaadiidka. Waxaan ku ahaa hoggaamiye bulshadeed Degmada 5 muddo 17 sanno ah, aniga oo u shaqeynaya sida Madaxweynaha Isbahaysiga Creek Thornton, hoggaamiye saamayn leh oo ka tirsan Kooxda Daneeyayaasha Northgate, Isku-duwaha Guddiga Degmada Waqooyi (North District Council), iyo madaxa nidaamiyaha ee Shabakada Bulshada D5. Anigu waxaan ahay qof degan Northgate, waxaan si

qoto dheer u ogsoonahay baahooyinka iyo himilooyinka bulshada Magaalada Lake, waxaana doonayaa in aan la shaqeeyo bulshada iyo dhammaan labada dhinac ee Aurora si loo bedelo dayicaada muddo jireenka ah. Anigu waxaan ahay kireyste, waxaan ku raaxaystaa oona qiimeeyaa kaladuwanaanshaha D5, waxaana ahmiyad siin doonaa la dagaalanka guri la'aanta ee dhisida ama horumarinta cusub. Waxaa sharaf ii ahaan doonta in aan helo Waraaqahaaga lacagta ee Dimuquraadiyada!

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Musharaxa: Mark Mendez
Magaca Ololaha: Mark Mendez oo u sharaxan Gollaha degmadda Seattle (Mark Mendez for Seattle City Council)
Websaydka ololaha:
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 5
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-551-3320
Hordhaca Murashaxa:
Waxaan u tartamayaa Gollaha Magaalada Seattle sababtoo ah dadka degen Waqooyiga Seattle waxay diyaar u yihiin aragtida cusub ee Degmadda 5 iyo la xisaabtanka. Waxaan ku dhashay oo lagu barbaariyey gudaha Seattle oo waxaan ku noolaa Degmadda 5 Xaafada Lake City ilaa 41 sanadood. Waxaan ku qaatay noloshayda iyo mihnada anoo ka shaqaynaya dhowr arrimaha maxaliga iyo sinaanta caalmiga ah. Waxaan hayaa diiwaanka inaan wax qabto anoo isku keenay oo iskaashi la samaynayo kooxda kala duwan ee dadka ah iyo ururada si looga hadlo cabadaha ugu wayn gudaha Seattle iyo Degmadda 5. Waxaan u shaqeeyey dhowr aan macaash doon ahayn, waxbarashp, iyo ururada dad waynaha; ahaa qofka La maamulao Gollaha Degmada Waqooyi, guddida Xaafada Lake Cit Alliance, iyo guddida Daryeelka Bulshadda Meadowbrook. Waxaan doonayaa inaan keeno mid lagu daydo guusha oo la mid ah ka aan haystay markii wada jir aan ula shaqaynayey kooxaha bulshadda iyo ururada oo ku dabaqo moodeelka dhammaan Degmadda 5.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Tayla Mahoney
Magaca Ololaha: Mahoney oo u sharaxan Seattle (Mahoney for Seattle)
Websaydka Ololaha: mahoneyforseattle.org
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 5
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-388-7328
Hordhaca Murashaxa:
Waad ku mahadsan tahay inaad wakhti ku qaadato inaad cilmi baadho musharaxiintaada Gollaha Magaalada Seattle. Waxaa sharaf ii ah oo aan xiisaynayo inaan u tartamo wakiilka mustaqbalka ee Degmadda 5. Waxaan ku dhashay oo aan ku koray halkan oo waxaan daneeyaa Magaaladaada. Waxaan rumaysanahay Gollaha Magaalada Seattle inuu u baahan yahay aragtiyo

cusub, iyo xamaasada dib loo cusboonaysiiyey si loo matelo maya keliya Degmooyinkeena xidhmada leh, laakiin Magaaladayada gebi ahaan.

Waxaan doonaya ainaan ku jiro gollaha magaalada ee samayn kara isbeddel. Waxaan doonayaa inaan arko dhibteena kobcaysa ee maandooriyaha si buuxdo inay u yaraato, oo taasna, yaraynta dembiga dhismayaasha, iyo yaraynta qof mustaqbalkiisa inuu ku dambeeyo guryaha gaboodka ah. Waxaan doonayaa inaan arko korodhka adeegyada bulshadda si loo yareeyo dembi dib u gelida dambiilaha iyo si looga hortaggo hoy la'aanta. Waxaan doonayaa inaan tan ka guul gaadho iyaddoonay jirin cashuurahan aadka sare ugu kacaya. Waxaan doonayaa inaan hirgeliyo xalalka xaqiiqda ku salaysan, ee sida wanaagsan loo cilmi baadhay ee dhibaatooyinka aanu la kulmayno.

Murashaxan kama qayb gelayo Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Dan Strauss
Magaca Ololaha: Seattle uu u sharaxan yahay Straus (Seattle for Strauss)
Websaydka ololaha: seattlefordanstrauss.org
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada 6
Lambarka Telefoonka Ololaha: (205) 569-8775
Hordhaca Murashaxa
Isagoo ku dhashay kuna barbaaray Ballard, adeegu waa Dan ahmiyadiisa.

Waxa uu la shaqeeyay AmeriCorps gudaha bulshadda dakhligeedu hooseeyo Ameerika oo dhan, oo ka shaqeeyay mashaariicda samata bixinta masiibooyinka ilaa barnaamijyada dugsiga ka dambeeya.

Wuxuu qaaday masuuliyada arrima wayn oo dad wayne oo waa uu ku guulaysatay. Waxaanu ka shaqaynay sharciga Amarka Ilaalinta Khatarta aadka ah gudaha Olympia, ololaha hindisaha, iyo hirgelinta xeerarka ka hortagga rabshada hubka fudud.

Iyaddoo ay ugu dhawaan tahay toban sano khibrada sharci, Dan waxa uu garanayaa inuu isbeddel sameeyo dhaca. Waxa uu wadajir iskugu keenay dhammaan heerarka dowladda si loo xaliyo dhibaatooyinka. Waxa uu isku xidhay gobolka, degmadda, magaalada, iyo kooxaha bulshadda si loo maalgeliyo mashaariicda gaadiidka, loo horumariyo summadaha dhismaha cagaaran, oo loo horumariyo beeraha lagu nasto.

Dan waxa uu cod siin doonaa dadka degen Degmadda 6. Waxa uu ahmiyada saari doonaa adeegyada bulshadda, ka furi doona xafiis degaanka, ka hadli hoy la'aanta iyo dhibaatada guryaha, oo dhisi doonaa shabakada safarka ee dhammaanteen inoo shaqeeya.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Murashaxa: Jeremy Cook
Magaca Ololaha: Jeremy Cook oo u sharaxan Gollaha degmadda Seattle
Websaydka ololaha: cookforcouncil.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 6
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206.664.1293
Hordhaca Murashaxa:
Jeremy waxa uu ku noolaa oo ku shaqayastay sida Nashqadeeyaha Garaafka gudaha Seattle wax ka badan toban sano. Waxuu xiiseeyaa hawlaha badan ee raaxaysiga iyo madadaalada ee ay Seattle bixiso. Waa Eagle Scout oo waxa uu shahaadada digriiga ka haystaa wada xidhiidhka kulliyada Northwest College.

Waxa uu u tartamayaa gollaha magaalada sababtoo ah waxa uu doonayaa inuu wax ka qabto arrimo badan oo Seattle ku wajahan. Waxa uu rumaysan yahay xidhida dadka gala dembiyada ku lidka ah kuwa kale ama hantidooda. Jeremy waxa uu ka shaqaynayaa dib u dejinta badanka dembiilayaasha ugud ran. Wakhtiyada qaarkood tani waxay u baahan doontaa ka daawaynta maandooriyaha marka la xidho iyo shaqada siidaaynta la kormeero.

Jeremy waxa uu doonayaa inuu Seattle ka dhigo meel aad loo awoodi karo in lagu noolaado. Magaaladu waa inay uga faa'iidaysataa khayraadkeeda so xikmad leh markaas tani waa suuragal. Sida horuamriyayaashu u sameeyaan daneeyayaashooda magaaladu waa inay qabato muwaadiniinteeda, iyaddoo hadafka magaaladu yahay guryo la kiraysan karo halkii lagaga macaashi lahaa.

Fadlan uga fekere Jeremy foojaradaada oo u codee.

Mahadsanid.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Murashaxa: Joey Massa
Magaca Ololaha: Joey Massa ee Horumarka
Websaydka ololaha: www.MassaforProgress.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 6
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-717-5675
Hordhaca Murashaxa:
Joey Massa, ka tirsanaa Ciidamadii Hore ee Qaranka iyo qof ka badbaaday kansarka, waa murashaxaha booska Gollaha Degmadda Seattle Degmadda 6. Massa, oo la nool xaaskiisa Ballard, waxa uu ugu soo biiray tartanka hab dhab ah horumarinta caafimaadka dad waynaha iyo badbaadada, gaadiidka iyo tayada nolosha sare u soo qaadka magaalada qarniga 21naad.

"Magaaladaydu waxay isku dayday wakhtiyo badan inay hagaajiso dhibaatooyinkeeda qalabka gaboobay ee jaban," Massa ayaa yidhi. "Anoo ku qaatay sanado badan gudaha degmadda,

waxaan garanayaa kuwa badan oo jaarkayga Northwest Seattle inay igu soo biirayaan naxariistayda ka hadlida hoy al'aanta, dib uga fekerka gaadiidka dad waynaha, oo awood siinaya jawaab celiyayaasha koowaad. Waxaanu nafahayga ku jirnaa wakhti ay siyaasiyiin badan iskaga tageen wax u qabadka dadka kale iyagoo dan mooday maal ama awood. Waxaanu u baahanahay inaanu keeno hogaanka u adeegaha, dibloomaasiyada, iyo wax dhab ah u qabadka Hoolka Magaalada, oo waxaan u shaqayn doonaa si adag si aan u kasbaddo kalsoonida cod bixiyayaasha markaas waan qaban karaas taas."

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Murashaxa: John Peeples
Magaca Ololaha: Peeples oo u sharaxan Seattle
Websaydka ololaha: www.peeplesforseattle.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 6
Lambarka Telefoonka Ololaha: (206) 552-0872
Hordhaca Murashaxa:
John Peeples waxa uu u tartamayaa Gollaha Magaalada, Degmadda 6, si uu ugu faa'iideeyo korodhka dadka madaniga ah dhaqaalaha ee dhammaan dadka degen magaalada. Seattle waa magaaladaadii. Waxaanu ku samayn doonaa isbeddel togan gollahaaga magaalada anagoo u tilmaamaynta Seattle jihada sharafta, badbaadada iyo barwaaqada. Waa injineer keeni doonaa habab laga fiirsaday oo xalinta dhibaatooyinka ah si loo xaliyo dhibaatooyinka magaalada oo dhan.

John waxa uu taageeraa sharci fulinta hawlgalkeeda badbaadada dad waynaha. Caafimaadka maskaxda iyo isticmaalka maandooriyaha
dhibaatooyinka, qayb ka noqoyaya hoy la'aanta, waa in lagu saxaa daryeelka caafimaadka iyo bogsashada, ma aha in la dhiirigeliyo is waxyeelaynta. John waxa uu xaqiijin doonaa in aan la oggolaan goobaha maandooriyaha la isku muddo gudaha magaaladayada. Waxa uu la dagaalami doonaa cidhiidhiga qiimaynta iyo beddelka Magnolia Bridge markaas jaarkayaga waxa ay sii wadi karaan inay galaan guryahooda.

Waxa uu bilaa lacag ugu shaqeeyaa Barnaamijka Homework Helper oo dhawaan waxa uu dhammaystiray Waaxda

Xaafafadaha Dadka Kulliyada ee Ka qayb galka Bulshadda.

Murashaxan kama qayb gelayo Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Musharaxa: Jon Lisbin
Magaca Ololaha: Friends of Jon Lisbin
Bogga internetka Ololaha: jonlisbin.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 6
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-794-5969
Horudhaca Musharaxa:
Maadaama aan ahay qof degan Ballard muddo ka baddan 15 sanno oona iska leeyahay ganacsi yar, waxaan si qoto dheer ugu lug leeyahay bulshadeena - sida ahaanshahayga Agaasimaha Ururka Macalinka Waalidka K-8 ee Salmon Bay (FOSB), tababaraha iyo Xubinka Guddiga ee horyaalka Yarka ee Ballard, iyo Madaxweynaha Bandhiga Kobcitaanka Seattle, deriska kooxda u doodista kuwaas oo hadafkoodu yahay in lasii ilaaliyo ku noolaanshaha Seattle halka la maamusayo weynaanteeda xad dhaafka ah. Anigu waxaan u tar-tamayaa Guddiga Magaalada Seattle si awood loo siiyo deriskeena oona loo xaliyo arimo baddan oo ay Seattle maanta la kulmayso sida helida guriga, guri la'aanta iyo la tacaalida kobcitaanka magaaladeena. Raad raacida ololaha, waxaan si joogto ah u maqlay in dadka deegaanka aysan dareemin in uu maqlo Guddiga Magaalada wel-weladooda ama u bixinayo lacagtooda canshuurta ah si wanaagsan. Haddii la i doorto, waxaan hubsan doonaa in dhammaan codadka la qiimeeyo lana maqlo. Waan ku faanaa in aan kaqayb qaato barnaamijka Warqada lacagta Dimuquraadiyada waxaana sharaf ii ah in aan helo codkaaga.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Musharaxa: Kate Martin
Magaca Ololaha: Put Kate On the Council
Bogga internetka Ololaha: https://www.putkateonthecouncil.org/
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 6
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (206) 579-3703
Horudhaca Musharaxa:
Waan idin salaamay dadka deegaanka iyo ganacsatada ka ahaada dhinaca Green Lake illaa Golden Gardens iyo Blue Ridge illaa Fremont.
Degmada 6 waxay ahayd mid aysan ku haysanin dad matala gudaha guddiga. Kaalay aynu midaasi xalino.

Maadaama aan ahayn qof degan Degmada 6 mudo 33 sanno ah, waxaan si xad dhaaf ah ugu lug lahaa arimaha degmada iskuulka iyo, guud ahaan magaalada, deegaanka tan iyo 90-kii shaqadayda ah sida qorsheeye xirfadleh iyo naqshadeeyana waxay tobanaan sanno isiisay khibrad horumarin wax qabad leh iyo fikrado wax ku ool ah kuwaas oo shaqeeya. Waxaan u ordaa la shaqaynta iyo samaynta “in aan gudaha u quuso” arimaha loogu baahanyahay in lagu horumariyo siyaasad wax ku ool ah iyo sharciyayn.

Mushkiladaheena heerka-dhibaatada ah ay kamid tahay lacag la'aan faafta iyo dadka lacag la'aanta ah, dembiyo aad u kacsan, anshax xumo iyo nidaam la'aan, iyo waayida guri la awoodi karo iyo meel ganacsi waxay u baahanyihiin xal dhakhso ah oo dhexdhexaad iyo xad dhaaf ahba.

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Igu tasho in aan ka hadlo mowjada lacag bixinta xad dhaafka ah, maamul darida kobcitaanka, iyo weerarada sharciyadeed ee ka jira deriskeena iyo ganacsiyada yar-yarka ah.

Waxaa sharaf ii noqon doonta in aan helo taageeradaada.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada.

Magaca Murashaxa: Melissa Hall
Magaca Ololaha: Hall4Six
Websaydka ololaha: www.Hall4Six.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 6
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-708-4500
Hordhaca Murashaxa:
U samaynta meel banaan dadku waa shay caqabad ku noqda magaalao kasta, laakiin waa caqabad Seattle ay ka bixi karto oo waa inay buuxisaa joogida meel buuxinaysa, aqbalaysa meesha ay ku faanto inay laf ahaanteedu ahaato. Waxaanu u baahanay meelo badan dhammaan noocyada dadka ah ay ku noolaadaan, oo waxaan u baahanay qaabab looga wareego oo aan ku tiirsanayn lahaanshaha baabuurka ee gaarka ah. Waxaanu samaynay horumar wanaagsan, laakiin taasi waa qaybta adag ee dhexe ee aanu ka gudbayno halka aanu ka samayno sibeddelo dhaco wakhti kasta oo aad dhisayso shay wayn. Dhinaca kale waxaa ah magaalo ay ka buuxaan bulshooyin yaryar halka waxa aad u baahan tahay ay dhow yihiin.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Murashaxa: Sergio Garcia
Magaca Ololaha: Sergio oo u sharaxan Seattle
Websaydka ololaha: http://sergioforseattle.org/
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 6
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-446-8968
Hordhaca Murashaxa:
Anigu waxaan ahay Sergio Garcia, degen Phinney Ridge, iyo sarkaal boolis ah kaas oo loo qoondeeyay aaga Ballard/Fremont. Waxaan jeclahay farxada magaaladeena, kala duwanaanshaha, qiyamka horumarka leh, u dhawaanshaheeda dabeecada maamulka iyo bulshadda rayidka ah. Tani waxay u buurtaa tayo ka wanaagsan oo nolosha ah dhammaanteen, ay ku jiraan muhaajiriinta, qaxootiga iyo bulshooyinka LGBTQ. Waxaan qiimeeyaa saaxiibtinimada aan la yeeshay dadkeena degen, mulkiilayaasha ganacsiyad ayaryar, iyo hoy la'aanta. Waxay ii oggolaadeen inaan fahmo halganka maalinlaha ah ee uu qof kastaa la kulmo gudaha Degmada Lix. Sarkaal ahaan, waxaan qaabilay caqabadaha degmadeena. Waxaan fahmayaa sababaha u asalka ah, oo waan ogahay inaan ka gudbi karno. Waxaan u tartamayaa

inaan horumariyo tayda nolosha qof kasta gudaha bulshadda, anoo qaadanaya habka dheeliga tiran ee wax ka qabashada arrimaha aadka u qalafsan ee inala soo gudboonaada.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Terry Rice
Magaca Ololaha: Elect Terry Rice
Bogga internetka Ololaha: www.ElectTerryRice.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 6
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206.799.5280
Horudhaca Musharaxa:
Waxaan ahayn mushahar arimaha ka baaraan daga, oo hormar leh. Sida inta badan dersiyada xaafada Degmada 6 waxaan ka warwarsanahay tirada dadka ee aadka u saraysa ee ay lasoo deristo guri la'aantu. Tani maaha masiibo bilaa aadanimo oo kaliya laakiin mushkilad caafimaadka iyo badbaadada shacabka. Waxaa jira waxyaabo gaar ah oo aad iminka samayn karto si hos loogu dhigo tirada dadka ay bilaa gurigu lasoo darsi karaan. Waxaynu leenahay 12,000 oo ruux oo bilaa guri ay lasoo deristay magaaladeeda iyo 6,000 sariiro. Iyada oo sanadkii ku dhawaad lagu bixiyo $200 milyan bixinta adeegyada dadka bilaa guryaha ay lasoo deristo waxaa jira waxyaabo badan oo wax laga qadan karo mushkiladaha sidan oo kale hadii si wanaagsan loo maamulo. Si aynu hoos ugu dhigno saxmada iyo si hoos loogu dhigo wasakhda hawada waa inaynu sii wadnaa inaynu maalgalino tareenadeena iyo hormarka adeegyada tareenadeeda inta la dhigayo khadka tareenka fudud. Waa inaynu markasta u ogolaanaa ADU magaalada oo dhan ah iyo inaynu ilaalinyo tuulooyinka la degan yahay si aynu wax uga qabano kharashka guryaynta ee Seattle ee cirka isku shareerey.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Andrew Lewis
Magaca Ololaha: Lewis oo isu sharaxa Seattle
Bogga internetka Ololaha: www.lewisforseattle.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 7
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-434-5871
Horudhaca Musharaxa:
Magacaygu waa Andrew Lewis oo waxaan u tartamayaa si aan wakiil kaaga noqdo Gollaha Degmadda Magaalada Seattle sababtoo ah waxaan ballan ku qaadayaa dhisida guryo la awoodi karo, sugida beddelka hal ilaa hal ee Buundada Magnolia, u dagaalanka dugsiga magaalada hoose, iyo ballaadhinta wax qabadka hanti dhowrida dowladda magaaladeena. Waxaan ku korey Seattle qoys dabaqada shaqaysa ah, oo waxaan ka qalan jebiyay Dugsiga Center School ee Queen Anne. Waxaan ahay qof si ku faanid leh uga qalan jebiyay Jaamacadda Washington,

sidoo kale Dugsiga Dhaqaalaha ee London, iyo Jaamacadda California, Berkeley, Dugsiga Sharciga. Hadda waxaan ka shaqeeyaa Xafiiska Qareenka Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle. Si ku faanid leh u taageertay, Degmadda King Gollaha Shaqada. Jamhuuri. Gael Tarleton; fmr. Xubinta Gollaha Degmadda Larry Phillips; fmr. Xubnaha Gollaha Deegaanka Magaalada Martha Choe, Heidi Wills, Nick Licata, iyo Peter Steinbrueck; iyo qaar kale oo badan!

Waxaan aad u rajaynayaa inaan wax badan adiga kaa barto, oo waxaan rajaynayaa inaan helo codkaaga!

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Don Harper
Magaca Ololaha: Don Harper oo u sharaxan Seattle (Don Harper for Seattle)
Websaydka Ololaha: donharperforseattle.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada 7
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-351-5587
Hordhaca Murashaxa
Don Harpe waxa uu ku koray Shoreline oo waxa uu ku noolaa Seattle ilaa 49 sannadood. Waxa uu u shaqeeyey sida maareeyaha masraxa/maareeyaha jidka, waa Khabiir Korontada ah oo lahaa shirkadiisa ilaa 28 sanadood. Waxa uu ka shaqeeyey Gollaha Degmadda Queen Anne ilaa 21 sanadood, waa Guddoomiyaha Guddiga Parks.

Don waxa u u tartamayaa codkaaga Gollaha Degmadda. Gollahu in dheeraad ah ma dhegaysto muwaadiniinta ama ma maalgeliyo ahmiyadooda. Ma ku kharash garaynaa $286 milyan si “aan u hagaajino” nidaamka baabuurka korontada magaalada ee xumaaday taas oo meesha ka saaraysa haadad badan oo baabuurta jidka marta Jidka 1aad? Maya, waa inaan helnaa xalal ka fiican oo Shaqaynaya.

Don waxa uu fahansan yahay inaan u baahanay maalgelinta barnaamijyada guriyeynta hoy la’aanta la caddeeyeyn oo laga xisaabtamo. Kuwan ay haleeshay arrimaha maandooriyaha, waxaan u baahanay daawayn laakiin may xashiishada hiiroyiinta oo bilaasha ah ama goobo la isku durro.

Don waxa uu taageeraa shaqooyinka xeebta ee leh deked cusub oo biyaheedu qoto dheer yihiin – kuwan waa shaqoyinka qoyska mushaharka badan.

Murashaxan kama qayb gelayo Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Gene Burrus
Magaca Ololaha: Saaxiibada Gene Burrus (Friends of Gene Burrus)
Websaydka ololaha: https://geneforseattle.com/
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada 7
Lambarka Telefoonka Ololaha:
Hordhaca Murashaxa
Gene Burrus waa qareen ku noolaa Faras magaalaha Seattle in ka badan toban sano. Ballan qaadkiisa badbaadada xaafada iyo mucaaradka aadka u hadla ee Faras magaalaada aan dimuqraadiga ahayn Degmada Horumarka Maxaliga ah (LID) waxay u sameeyaan doorashada cad si uu u metelo Degmada 7aad.

Gene waxa uu arkay xooga hogaanka magaalada muwaadiniinteeda si loo aqbalo xaafadahooga inay noqdaan suuqyada maan doorayiha sharci darrada ah, suuqyadooda uu ka buuxo dembigu, iyo guryahooda iyo hantida loo arkayo inaanay u qalmin ilaalin.

Dadka degen Seattle waxay u qalmaan inay fahmaan in magaaladu u shaqayso dadka, may qaabka ku lid ah. Gene waxa uu ku celin doonaa yoolka shaqooyinka muhiimka ah ee dowladda magaalada, jawaabayaasha taageeraya gurmadka, helida xalal daacad ah wixii ah hoy la'aanta iyo qabatinka maandooriyaha, iyo adkaynta masuuliyada maaliyadeed iyo la xisaabtanka,

Codka madaxa banaan ee Gene ee Gollaha magaalada waa isbeddelka ay Seattle u baahan tahay.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Isabelle Kerner
Magaca Ololaha: Kerner oo u sharaxan Gollaha deegaanka
Websaydka ololaha: kernerforcouncil.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 7
Lambarka Teleefoonka Ololaha: 206-271-1560
Horudhaca Musharaxa:
Iyaddoo ku dhalatay kuna kortay Seattle, Kerner waxay uu horumarisay aragti qaali ah ee Seattle dimograafigeeda marka ay ka tagtay qaybta dugsiyada gaarka ah si ay u timaado Dugsiga Sare ee Garfield halka ay ka qayb qaadatay barnaamijka "Bilowga Tartanka:.
Kerner waay ka qalan jebisay Jaamacada Maraykanka ee Washington, DC oo haysata digriiga Sayniska Siyaasada & mida yar ee ay qaatayna Fanka Istuudyaha. Kerner waxay xirfad shaqo ku qaadatay Senetarka Gobolka Washington, Maria Cantwell, ka hor intii aanay u shaqayn Khabiirka Soo xaraynta Caalamiga ah xaga shirkada sharciga ruqsada leh, Banner & Witcoff.

Kerner waxay ku dhaleecaynaysaa Gollaha degmadda hadda hal abuur la'aan, u diyaar la'aanta wax wada qabsiga, iyo karti darrada in lala shaqeeyo ganacsiyada dhammaan intay doonaan ha leekaadaane wixii ah ka sii darista Seattle cadaadiska ugu badan ee dhaqan dhaqaale bulsho iyo arrimaha siyaasada. Kerner waxay qorshaynaysaa inay wax ka qabato hoy la'aanta iyaddoo u beddelaysa kontaynarada alaabta lagu keeno guryo ku meel gaadh ah, iyaddoo isticmaalaysa dhulka aan aadka loo isticmaalin ama madhan ee magaaladu leedahay, siinaysa dadka fursadaha

ay lacag ku kaydsadaan nadiifinta qashinka hoy la'aantu keentay, iyo iskaashi lasamaynta shirkadaha la tacaalaya buuxinta dalabaadka kordhaya ee shaqaalaha xirfada leh.

Musharaxaan ma ahan mid kaqayb qaadanaya Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Musharaxa: Jason Williams
Magaca Ololaha: Dooro Jason Williams (Elect Jason Williams)
Websaydka ololaha: www.electjasonwilliams.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada 7
Lambarka Telefoonka Ololaha: 253-335-9564
Hordhaca Murashaxa
Waxaan u tartamayaa Gollaha Magaalada si hore loogu sii wado badhaadhaha la wadaago oo loo horumariyo tayada nolosha.

Sidii Yale MBA iyo suuq geeyaha alaabta, waxaan doonayaa dhaqaalaha Seattle inuu samaado sababtoo ah kobacu waxa uu abuuraa shaqooyin oo waxa uu soo jiitaa maalgelinta. Si kastaba ha ahaatee, waa inaan samayno wax badan si aanu u xaqiijino in qof kastaa ka faa'iidaysto koboca. Halkan, waxbarashaddu ahmiyada wayn ayay leedahay. Waa inaan bixinaa gelitaan caalami ah mid oo la awoodo, waxbarasho hore oo aad u tayo sareeysa sababtoo ah ilma kastaa waxuu u qalmaa fursad loo siman yahay oo nolosha iyo mihnada ama shaqo.

Marka ay magaaladu kobocdo, waa inaan sidoo kale dhisnaa seeska tayada nolosha horumarsan. Waa inaan ilaalinaa dhulalka, marinada biyaha, iyo goobaha dhaxalka taariikhiga ah leh ee ka dhiga Seattle meel gaar ah, marka aynu siinayno qof kasta codka qaabaynta xaafadeena, dhaqanka, iyo meelaha dad waynaha.

Mustaqbalkan nolosha fiican, cid kastaa qayb ka tahay waxa uu keliya ku suurtageliyaa haddii aan ilaashano aaminaada aan u qabno dowladda hoose. Tani waxay u baahan yahay dhegaysi wanaagsan, isla xisaabtan ka wayn, iyo degdeg wax uga qabashada caqabadaha cadaadiska leh ee maalinta: hoy la'aanta, lacag la'aanta, iyo sinaan la'aanta qaab dhismeedka dadka midabka leh.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Magaca Murashaxa: Jim Pugel
Magaca Ololaha: Saaxiibada Jim
Websaydka ololaha: www.jimpugel.com
Lambarka Gollaha Degmadda Magaalada: 7
Lambarka Telefoonka Ololaha: (206) 286-0410
Hordhaca Murashaxa:
Waxaan ku dhashay Seattle oo waxaan ku noolaa halkan noloshayda oo dhan. Waxaan ku qaatay tobanaan sano ilaalinta iyo la shaqaynta dhammaan dadka kala duwan gudaha qaybaheena

dowlad iyo dad waynaba. Waxaan u tartamayaa Gollaha Magaalada si aan ugu sameeyo horumar dhab ah arrimo tiro badan oo la soo gudboonaaday bulshadeena. Arrimaha sida wax haynta, isku mid wada haanshaha, gaadiidka iyo isku socodka. Waxay u keeni doonaa waayo aragnimadayda diyaarka ah badbaadada dad waynaha, adeegyada aadamaha, iyo ilaalinta xuquuqdayada iyo qiyamka horumarka ee Gollaha. Seattle waxay ku dhisan tahay aasaaska jaarar aad u wanaagsan oo taageerada dhamman dadka ka socda qayb kasta oo nolosha ka mid ah. Iyaddoo ay inla soo gudboonaatay dhibta way awoodista ee faquuqaysa dad badan oo jaararkeena ah, waa inaan hubinaa inaynu kobcino qaabab dhisa aaminaada dad waynaha, xaqiijiya furfurnaanta, oo loogu muujiyo ballan qaadkeena Seattle sidii magaalo dadkoo dhan leeyihiin. Aad bay sharaf iigu ahaan lahayd inaan codkaaga helo.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program)

Magaca Musharaxa: Michael George
Magaca Ololaha: Dadka u codaynaya Michael George
Bogga internetka Ololaha: http://www.michaelforseattle.com
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 7
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (206) 513-3664
Horudhaca Musharaxa:
Michael Georg waxa uu u tartamayaa inuu la xisaabtan u keeno iyo fekerid dhab ah Hoolka Magaalada. Waxa uu ballan ku qaadayaa kordhinta gurya helida dadka dhamaan da' kasta iyo dhakhliyo kasta, u fududaynta dadka inay gaadhaan iyo dhexda Magaalada, xalinta dhibaatooyinka ka hor yimaada jaarka aan hoyga haysan iyo u habbaynta Seattle guul xili dheer ah. Ka shaqaynta qaar badan oo guryaha Seattle ah iyo mashaariicda gaadiidka, Michael waxa uu keenayaa waayo aragnimo dhab ah oo adduunka runta ah Gollaha oo waxa uu fahmayaa caqabadaha dheelitirka ku darka iyo hagaajinta qaab nololeedka xaafada.

Michael waxa Magaalada hoose kula nool yahay xaaskiisa iyo labba carruura oo da' yar. Michael waxa uu cid la hogaamiyaa Waalidka wixii ah Magaalada Hoose ee Seattle oo ka fiican (Parents for a Better Downtown Seattle), urur aan macaash doon ahay oo u hagar baxay ka dhigida magaalada hoose xaafad u fiican carruurta. Sidoo kale waxa uu ka shaqeeyay Dugsiga Dad waynaha Seattle Awooda Xooga Hawsha, oo waxa uu mutadawac ugu shaqeeyaya mashaariic tiro badan oo loogu talo galay ka dhigida Seattle inay u shaqayaso dadka dhammaan da'aha oo dhan iyo dhakhli walba.

Musharaxaan wuxuu kaqayb qaadanayaa Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).

Seattle Ethics & Elections Commission

Horudhacyada Musharixiinta

Magaca Musharaxa: Naveed Jamali
Magaca Ololaha: Naveed for Seattle
Bogga internetka Ololaha: http://naveedforseattle.com/
Lambarka Degmada Guddiga Magaalada: 7
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (425) 954-3286
Horudhaca Musharaxa:
Seattle waxay qabtaa mushkilad hogaamin. Dawladeena Hoose waxay ku guuldaraysatay inay hormar dhab ah ka gaadho mushkilada dhabta ah.
Tani waa fursad inooloo siiyay inaynu ku diidno waxa ay ku guurdaraysteen, inaynu samayno xeerar iyo inaynu doorato wakiilo kuwaas oo ku faraxsan inay u shaqeeyaan oo ay matalaan masuuliyadooda. Degmada 7, Naveed Jamali ayaa ah ikhtiyaarka cad.
Naveel waxa uu noloshiisa ku bixiyay inuu shacabka ilaaliyo. Waxa uu ogyahay in hogaanka dhabta ah uu u baahan yahay inuu wado sidii uu runta usoo saari lahaa, oo uu si xushmad leh u aqbalo khaladka uu sameeyay, oo uu sheeso geesinimada uu ku tijaabin karo dhabada hore loogu soconayo. Waxaanu naqaanaa waxa ay ka dhigan tahay in wax loo sameeyo si badalkii loo helo wax kale.

Naveel waa sarkaal sirdoon oo Ciidamada Neefiga ah, qoraa, iyo qiimeeyo hore oo MSNBC ah. Waxa uu abaal marin ka heley Maamulaha FBI Robert Mueller shaqada uu u qabtay shacabka ee Xafiiska. Waxa uu abaal marin ka heley New York's Humanitarian Medal taas oo ka danbaysay wax qabadkii Duufaankii Sandy. Waxa uu la degan yahay Queen Anne xaaskiisa iyo caruurtiisa.

Musharaxaan ma ahan mid kaqayb qaadanaya Barnaamijka Warqada lacag bixinta Dimiquraadiyada (Democracy Voucher Program).